Cashuuraha 2016

Cashuuraha Fulinta iyo Cashuuraha Raasamaalka IV (BTA IV) ee dhismayaasha, Tiknoolojiga iyo Tacliinta

GOORMAA DOORASHADA LA QABANAYAA?

Doorashada khaaska ah waxaa loo qabanayaa codbixiyeyaasha Seattle February 2016. Gobolkan waxaa lagu codeeyaa boosta, sidaa darteed waxaa codbixiyeyaasha loosoo dirayaa warqadaha codbixinta January 2016. Warqada codbixinta waa in lasoo celiyaa Feb. 9, 2016.

CASHUURAHA LACAG INTEELEEG AYAA LAGU CODSANAYAA?

Waxaa la wadaa qorshe lagu go'aaminayo miisaaniyada ku baxaysa mashaariicda BTA IV, si aan u go'aamino kharashka cashuurta ah ee aan codbixiyaasha ka codsanayno. Xubnaha Hogaanka Dugsiyada Seattle waxay go'aamin doonaan kharashka BTA IV iyagoo ku salaysiinaya baahida dhaqaale. Kharashka cashuuraha ee lagu hawlgaliyaa wuxuu ku salaysan yahay qaaciido gobolku hore u dejiyey.

WAA MAXAY CASHUURTA BTA IV?

Cashuurta BTA IV (Dhismayaasha, Tiknoolojiyada iyo Goobaha Ciyaaraha/Tacliinta IV) waa cashuur raasamaal oo loo gudbin doono codbixiyeyaasha Seattle February 2016. Ogolaanshaha cashuurta BTA IV waxaa lagu maalgelin doonaa mashruucyo badan oo loo baahan yahay sida dhismeyaasha dugsiyada, tiknoolojiyada iyo dhismayaal lagu caawiyo tacliinta. Cashuuraha dugsiyada dadwaynaha Seattle waxay socdaan lix sano, Waxaananu samaynay jadwal aanu sadexdii sanoba mar ugu gudbino codbixiyeyaasha cashuuraha BTA ama cashuuraha Dhismaha ee (BEX).

Cashuuraha raasamaalka ee BTA IV waxay bedeli doonaan cashuurha hada ee BTA III. Cashuurta BTA III waxaa loo codeeyey sanadkii 2010, waxayna dhacaysaa sanadka 2017. Dhamaan mashaariicdii loogu talo galay in lagu furliyo cashuurta BTA III waxaa lagu dhameeyey wakhtigoodii iyo kharshii loogu talo galay. Faahfaahin ku saabsan cashuurta BTA ka fiiri boga kale.

WAA MAXAY CASHUURTA FULINTU?

Warqada codbixinta BTA IV waxa kale oo loogu codayndoonaa cashuurta fulinta oo badalidoonta cashuurtii fulinta ee loo codeeyey sanadkii 2013. Cashuurha fulinta ee dusgiyada Dadwaynaha Seattle waxaa sadexdii sanoba mar loo gudbiyaa codbixiyaasha. Waxaa lagu maalgeliyaa 25% shaqada maalmeedka degmada, waxaanay caawisaa barnaamijyo muhiima oo aanu gobolku si buuxda u maalgelin.

IMISA MASHRUUC AYAA LAGU FULINAYAA CASHUURAHA BTA IV?

Mashruucyada loo soo jeediyey in lagu hirgeliyo cashuuraha BTA IV waxaa ka mida horumarinta dhismeyaasha iyo tiknoolojiyada iyo caawimooyinka tacliinta. Mashruucyadu waxay u faa'iideyaan dugsiyada degmada oo dhan. Tan waxaa lagu go'aamin doonaa mashruucyada lagu maalgalindoono cashuurta BTA IV.

<fiiri boga kale>

SIDAY DUGSIYADA DADWAYNAHA SEATTLE U XUSHAAN LIISKA MASHRUUCYADA LAGU FULINAYO CASHUURTA DHISMAHA EE BTA IV?

Guddida Hogaanka dugsiyada ayaa dejisa xeerar loo raaco cashuuraha oo diirada lagu saaro qorshaha fog iyo habaynta dhismayaasha, iyo sidii loogu xoojin lahaa qorshayaasha kale ee waawayn ee degmada wado.

Waxaan heshiis la galay shirkada Meng Strazzara si ay u soo qiimayso xaalada ay dhismayaasheenu ku sugan yihiin, oo aan u ogaano mashruucyada u baahan in la hirgeliyo hada. Badqabka ardayda iyo shaqaalaha ayaa aad noogu wayn, markaa waxaanu bedelaa walxaha da'doodu afar sano ka wayntahay, waxa kale oo aanu xooga saarnaa ilaalinta dhismayaasha dugsiyada.

Waxaan tixgelindoonaa mashaariicda buuxindoona baahida Degmada ee mustaqbalka, tiiyoo si khaasa maskaxda loogu hayo koboca ardayda dugsiyada dhigata.

Liiska mashaariicda waxa kale oo aan la xidhiidhin doonaa qorshaha fog ee aan ku daryeelayno dhismayaasha si aan hoos ugu dhigno dhismayaasha in la dayactiro sugaya.

Waxaan tixgelin siin doonaa mashruucyada isticmaalka tamrta hoos loogu dhigayo, iyo kuwa kor loogu qaadayo degaanka, qaash ahaan mashaariicda isticmaalaysa tiknoolojida cusub ee qiiqa lagu dhimayo.

Waxaan rabnaa inaan xaqiijino ilaalinta qiimaha dhismayaasheena, anagoo hagaajinayna walxaha dhaawacaya dhismaha sida saqafka iyo dhaaqadaha oo la badalo iyo sagxada oo la ilaaliyo.

Waan tixgelindoonaa mashruucyada ay dadwaynaha iyo shaqaalaha dugsiyadu noosoo jeediyaan, si aanu u xulano mashaariicda u baahan in si degdega wax looga qabto.

Waxaan xulandoonaa mashruucyada aan si sahlan ugu dhamayn karno jadwalka aad cayino, anagoo og in lacagta cashuuraha lagu soo ururinayo mudo lix sanadood ah, mashaariicda dugsiyada ka socdaana u baahan yihiin in la xidhiidhiyo.

HALKEEN KA HELI KARAA WARAR DHEERAADA OO KU SAABSAN MASHAARIICDA CASHUURAHA RAASAMAALKA EE HADA SOCDA?

Warbixino ku saabsan cashuuraha raasamaalka ee dhismaha, tiknoolojiyada, tacliinta iyo garoomada ciyaaraha ee hore, kuwa hada iyo kuwa mustaqbalka waxaad ka heli kartaa shabakada BTA: http://bta.seattleschools.org/

Warbixino ku saabsan mashruucyada lagu hirgelinayo cashuurta Dhismaha ee Building Excellence IV (BEX VI) fadalan ka fiirso shabakada BEX ee: **http://bex.seattleschools.org/bex-iv/**

WAXAAN RABNAA INAAD NALA SOO XIDHIIDHO!

- Wixii su'aalo ama faalo ah ee ku saabsan **Cashuuraha Raasamaalka *BTA IV*** *fadlan ku soo dir emailka*: CapitalLevy2016@seattleschools.org.

- Wixii su'aalo ama faalo ah ee ku saabsan **Cashuuraha Fulinta**, faadlan ku soo dir emailka: budget@seattleschools.org

- Waxaad waraqaha kusoo diri kartaa adarayskan:
  Levies 2016, Seattle Public Schools,
  M.S. 22-336
  P.O. Box 34165
  Seattle, Washington, 98124-1165.

- Si aad noogu soo gudbiso mashruucyada aad rabto inaan hirgelino, fadlan arjiga xog ururinta ka buuxi internetka: **http://bit.ly/BTA-IV-Nomination**.
- **Xasuus: mashruucaad xulato waa inaan helaa inta ka horaysa April 30, 2015. Waad mahadsantihiin.**